

# U dabaaldegga soogalootiga cusub ee dadaalka muujiyey ee Alberta

Oktoober 12, 2023

Dowladda Alberta waxay sharfaysaa 31 reer Alberta ah oo ku dhashay dibadda ee dadaalkooda si ay u dhisaan bulshooyin adag, daryeel leh oo loo wada dhan yahay.

Bishii Juun, reer Alberta waxaa lagu martiqaaday inay soo magacaabaan dadka dalka ku cusub ee ay yaqaaniin - dhallinyarada, haweenka, waayeelka, ganacsatada, horjoogayaasha bulshada iyo kuwa kale - kuwaas oo ku hormariyey Alberta sida waxqabadyada iskaa wax u qabso ah, hogaamin, hal-abuurnimo, ganacsi ama waxbarasho iyo guulo xirfadeed ee Abaalmarinta Aqoonsiga reer Alberta ee soogalootiga cusub ah. Reer Alberta waxay ka jawaabeen baaqaas iyagoo soo magacaabay shaqsiyaad cajiib ah oo gacan ka geystay inay gobolka ka dhigaan meel ku wanaagsan bulsho ahaan, dhaqaale ahaan iyo dhaqan ahaanba.

"Alberta waxaa lagu dhisay himilooyinka iyo shaqada adag ee hal-abuurayaasha, ganacsatada iyo wax-dhisayaasha. Waxaan sii wadeynaa horumarka sababtoo ah gobolkayagu wuxuu soo jiidaa dad badan oo raadinaya fursadda iyo nololshada tayada sare ee aan halkan ku haysanno. Waxaan u hambalyeynayaa qof kasta oo abaalmarin ku helay, waxaan idiin kaga mahadcelinayaa sida aad nola wadaagteen dareenkiinna, xirfaddiinna iyo kartidiinna oo aad ku sii xoojinaysaan bulshooyinkiinna iyo gobolkeenna."

Danielle Smith, Premier

Magacaabista waxaa lagu qiimeeyay shuruudo ay ka mid yihiin tabarucaadka guud ee qofka lasoo magacaabay, sida ficilladoodu u buuxiyeen baahidii iyo sida ay u saameeyeen dad kale, iyo sida ay u muujiyeen hoggaamin. Si ay ugu qalmaan abaalmarinta, dadka lasoo magacaabay waa inay ku dhasheen meel ka baxsan Canada laakiin hadda waa inay yahiin degane rasmi ah ama ay haystaan muwaadinimo Canadian ah.

"Waxaan rabaa in aan hambalyo kal iyo laab ah u diro dhammaan kuwa abaalmarinta helay. Wax badan oo wax ku ool ah ayay u sameeyeen bulshooyinkeenna iyagoo la qabsanaya caqabadaha dal iyo luqad cusub. Haddii ay sannado badan joogeen Alberta ama in yar, shakhsiyaadkan dhamaantood waxa ay sameeyeen wax ku biirin qiimo leh waana uga mahad celinaynaa taas.

*Maxamed Yaasiin, Wasiirka Socdaalka iyo Dhaqanka*

"Abaalmarinta Aqoonsiga Dhowaan-soo-galayaasha Alberta maaha kaliya sharaf, waxay ka tarjumaysaa sida ay iiga go'an tahay inaan Alberta ka dhigo meel wanaagsan. Waxa ay hoosta ka xariiqday in, soogalooti cusub ahaan, inaan samayn karo saamayn macne leh aniga oo nafteyda u huraya horumarinta dhallinyaradeenna, ururada iyo bulshada."

*Harriet Tinka, qaataha, Abaalmarinta Ruuxa Ganacsiga*

Abaalmarinnada, oo markii ugu horreysay la soo bandhigay 2022, waa hal dariiqo oo ay dowladda Alberta ku taageerto kala duwanaanshaha iyo dhaqamada kala duwan.

### **Xaqiiqooyinka degdega ah**

- Qaybaha abaalmarinta 2023:
  - o Wax ku biirinta Xirfadda iyo Tacliinta
  - o Ruuxa Ganacsiga
  - o Goobo shaqo oo loo dhan yahay
  - o Horseedka Soogalootiga Cusub
  - o Niyad Sare
  - o Saamaynta Haweenka Soogalootiga ah ee Cusub
  - o Kobcinta Bulshada Yaryar
  - o Dhiirigelinta Ardayga
  - o Hogaamiyaha da'da yar

### **Xogta la xiriirta**

- [2023 Alberta Newcomer Recognition Awards Recipients](#)

### **Wararka la xiriira**

[Nominate a newcomer who's made a difference](#) (June 28, 2023)

### **Weydiimaha warbaahinta**

Sam Blackett

Xoghayaha Warfaafinta, Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

sam.blackett@gov.ab.ca

587-589-6048

Michael Kwas

Xoghayaha Warfaafinta, Socdaalka iyo Dhaqanka  
michael.kwas@gov.ab.ca  
780-264-5368